

"Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?"

Axmed Keyse Ali, London.

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' baa degelka redsea-online.com ku daabacay qoraal kooban oo uu ku gunaanaday in Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' yahay "aabbaha Miisaanka Maansada Soomaalida".

Cabdiraxmaan Barwaaqo dooddiisu waxay ku salaysan tahay caddaymo qoraal ah muujinayana hawsha Gaarriye ka qabtay Miisaanka Maansada Soomaalida. Haddii aan wax ku gooyo qoraallada Gaarriye ee Cabdiraxmaan xiganayo, Gaarriye waa aabbihii Miisaanka Maansada. Sidoo kale, haddii la tixgeliyo sida adag ee Barwaaqo u soo gunaanaday qoraalkiisa isaga oo doonaya inuu "dedefeeyo" waxa uu u arko libin u diidka Gaarriye, waxaan ku odhan lahaa Cabdiraxmaan Barwaaqo: "Lagaa daba odhan maayo!" Dhawr iyo toban cisho ka hor ayaan degello Soomaaliyeed (awdalnews.com iyo wardheernews.com) ku soo qoray maqaal af Ingiriisi ah. Dulucda maqaalkaa: abuurista aqoon isweydaarsi ku saabsan helistii miisaanka maansada Soomaalida.

Qoraalkeygaa (<http://www.awdalnews.com/wmview.php?ArtID=6671>) way ku caddeyd in aan rumaysnahay in wadashaqeyntii Brof Carraale iyo Brof Gaarriye keentay helista Miisaanka Maansada Soomaalida. Waxaan ku taliyey in labada suugaanyahan uu midba midka kale u libin siiyo.

Maxaan sidaa ugu taliyey haddii Gaarriye, waa sida uu ku dooday Cabdiraxmaan Barwaaqo e, yahay aabbaha "miisaanka maansada Soomaalida"? Miyaanay labo nin wax wada heli karin, lana odhan karin waa aabbayaashii helay...? Inta aan ka jawaabin su'aashan bal aan isla eegno Cabdiraxmaan Barwaaqo badheedhihiisa:

"Qodaxi meesheede, ... intii waxaasi oo doodihi dhacayeen Brof, Cabdillaahi Diiriye Guuleed xagguu isagu joogay? Ma xertii Gaarriyuu ahaa mise tii fallaagowday?"

Doodaha Barwaaqo xusayo waa kuwo ka dhashay jawaabtii gabayaagii Ibraahim Xaaji Cawad "Khoolli" ka bixiyey dadaalka hindise suugaaneed ee Gaarriye. Marka uu Khoolli leeyahay "Xerta Sheekh Gaarriye ayey jawaab ka sugeysaa" way caddahay in Gaarriye hormuud dariiqada miisaanka maansada Soomaalida yahay.

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' wuu bisleysiiyey aqoon-isweydarsigii: so bandhiggiisa qoraallada Gaarriye iyo Carraale ayaa bilay lafagurka helista miisaanka maansada Soomaaliyeed. Su'aasha aan weydiinayo Cabdiraxmaan Barwaaqo waa: Ma kaa codsan karaa inaad ii sheegto labada qof ee macallin Guush (BW Andrzejewski)ka hadlayo markuu sidan yiri:

No until the 1970s were the principles of the scansion system discovered and worked out in broad outline by two Somali scholars..." ('Somalia in word and image', 1986,p.37

Macallin Guush oo kaliya ma aha baadhayaasha sheegay in helista miisaanka maansada Soomaaliyeed tahay hawl iskaashi uu keenay. Baaraha Soomaaliyeed ee la yidhaahdo Axmed Aaden Axmed wuu xusay kaalinta Carraale markii uu qoray buugga qalin jibinta shahaadada Masterska . “Ladhka” buuggiisa qalin jebintu waa: “The Didactic Themes in Somali Poetry” , Wisconsin University, sanadkii 1983ka.

Su’aali kama taagna kaalinta Gaarriye ku leeyahay helista miisaanka maansada Soomaalida. Cabdiraxmaan Faraax ‘Barwaaqo’ oo xiganaaya Dr Martin Orwin wuxuu qoray sidan:

Waxaan leeyahay waa halkii Ina Sanweyne, GARI ILAAHAY BAY TAQAANE, [waxaa] dhab ah hawraartii u yidhi Dr Martin Orwin ee ahayd in Maxamed Xaashi Dhamac “ Gaarriye” loo aqoonsan yahay inuu yahay: Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed iyo Abuu Khaliilkii Soomaalida. In midhkaa la masuugana waxan u arkaa gardarro aan geedna loogu soo gabban.”

Ina Sanweyne xog dhinac uun uu ka hayo wax kuma gooyeen. Ma jiri karaan qoraallo si wada jir ah u qoreen Gaarriye iyo Brofessor Carraale? Buugga Brof Carraale sida faahfaahsan ugu kala dhigay noocyada maansada Soomaaliyeed iyo sida loo miisaamo waa “mahadho” Soomaalidu wadaagaan sida ay u wadaagaan dadaalkii barenimo iyo gabaayaanimo ee Gaariye. In laga dalbado Brofessor Carraale inuu “ladhka” buuggiisa (Miisaanka Maansada Soomaaliyeed” beddelo ma bannaana. Billowga aqoontu waa run ka sheegista ifafaalayaasha soo ifbaxay. Waxba la iskuma haystee wax baa la kala korodhsanayaa oo la wadaagayaa.

Axmed Keyse Ali,
London